

Helsinki

Doorashada luqadda A1 ee ardeyga dugsigiga bilaabaya




Aqoonta luqadeed ee dhinacyada badan leh waa hibo

Luqadaha kala duwan barashadooda waxaa baadhitaanada lagu cadeeyay inay faa'idooyin badan leedahay. Aqoonta luqaddu inay noqoto mid noocyo badan leh albaabo cusub ayaay qofka u furaysaa wakhtiga firaaqada ah, waxbarashadiisa iyo nolosha shaqada waxaayna ka caawinaysaa inuu barto dhaqamo iyo dad kala duwan.

Carruurta dabeecadaha ay leeyihiin ee ay ka mid yihiin in carruurta aanay malooyin hore lahayn, oo ay xiiseeyaan inay wax cusub bartaan oo ay tijaabiyaan, waxaay taageeraysaa barashada luqadda cusub.

Barashada luqadaha cusub waxaay kobcisaa xasuusta, awoodda wax sawirashada, awoodaha xallinta dhibaatooyinka iyo awoodda wax isku toosinta waxaayna kordhisaa awoodda luqadaha kale hadhow lagu baranayo.

Barashada luqadaha ee dugsiga hoose-dhexe



- B2** luqadda ikhtiyaariga ah ee barashadeeda la bilaabay fasalka 8-aad
- B1** luqadda ikhtiyaariga ah ee barashadeeda la bilaabay fasalka 6-aad
- A2** luqadda ikhtiyaariga ah ee barashadeeda la bilaabay fasalka 3-aad
- A1** luqadda ikhtiyaariga ah ee barashadeeda la bilaabay fasalka 1-aad

● = barashada luqadaha khasabka ah ● = barashada luqadaha ikhtiyaariga ah

Barashada luqadaha ee Helsinki

Fasalka koowaad ayaa lagu bilaabaa barashada luqadda ugu horreysa. Luqaddaas waxaa la dhaa luqadda A1. Muddada lagu jiro waxbarashada aasaasiga ah haddii uu qofku rabo wuxuu baran karaa isku gayn afar luqadood. Barashada luqada labaad ee dadka oo dhan ay wadaagaan waxaa la billaabaa fasalka 6-aad. Luqaddaas waxaa la dhahaa luqadda B1.

Doorashada luqadda ugu horreysa ee ikhtiyaariga ah waxaa laga bilaabi karaa fasalka saddexaad (luqadda A2) luqadda kalena fasalka sideedaad (luqadda B2).

Doorashooyinka luqaduhu way ku badanyihiin Helsinki: Luqadda A1 waxaa lagu baran karaa af iswidhish, af faransiis, af isbaanish, afka waqooyiga saame, af jarmal, af ruush, af estooniyaan, af shiinees ama af ingiriis. Haddii dugsigaaga dhow aanay macquul ku ahayn inaad ku hesho luqadda A1 ee aad rabto, ilmaha waxaa boos looga dalbi karaa dugsiga luqaddaas lagu baran karo.

Sidee loo dooranayaa luqadda A1?

Luqaddaada ugu horreysa waxaa wanaagsan inaad doorato adiga oo aad uga fiirsaday. Ilmaba ilmuhu ka yaryahay ayaay uga fududdahay inuu luqad cusub barto.

Luqadda ugu horreysa waxaa loo dooran karaa luqad uu ilmuhu bii'ada uu ku noolyahay aanu aad ugu maqlin. Sidoo kalena ka waalid ahaan looma baahna inaad taqaano luqadaha uu ilmahaagu baranayo.

Doorka uu waalidku ku leeyahay barashada luqadaha

Ka waalid ahaan shaqadaada weeyaan inaad ilmaha ku taageerto oo aad ku dhiiri galiso barashada luqadda. Waa muhiim inaad muujiso inaad xiiseynayso luqaddaas uu ilmuhu baranayo. Waxaad ilmahaaga barashadiisa luqadda ku taageeri kartaa inaad xoojiso luqadda uu ilmuhu guriga kaga hadlo ama luqadaha uu guriga kaga hadlo. Waxaa lagu taageeri karaa horumarinta barashada luqadda tusaale ahaan in wax la akhristo, in lagu sheekaysto oo lagu ciyaaro luqaddaas.

Hel doorashooyinka luqadaha ee dugsigaaga dhow

Doorashooyinka luqadda A1 ee dugsigaaga dhow waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee dugsiga cinwaankiisa "kieliohjelmä" hoostiisa. Waxaad ku heli kartaa dugsiga dhow ee ilmahaaga cinwaanka gurigaaga: edu.hel.fi/kouluhaku.



Helsinki

Talobixinta barbaarinta iyo waxbarashada

Tel. 09 310 44986 maalmaha shaqada,

saacadda 10–12 ja 13–15 limayl ahaan

koulutusneuvonta@hel.fi

Cinwaanka booqashada:

Työpajankatu 8, 00580 Helsinki

edu.hel.fi/tervetuloakouluun

Nasoo raac:

#HelsinkiOppii

@HelsinkiOppii

Barbaarinta iyo waxbarashada

Soosaaraha: Waaxda shaqada barbaarinta iyo

waxbarashada ee magaalada Helsinki

Qofka sawiray: Riku Ounaslehto.

Goobta lagu daabacay: Grano Oy, 10/2024.

Macluumaadka warbixinta waxaa la saxay bishii

Oktoobar ee 2024.

Waxaan reebanaynaa xuquuqda wax ka beddelista.

